




HADDII AAD U BAAHAN TAHAY DAAWAYN MEEL KU KOOBAN



MACLUUMAADKA BUKAANKA





TUSMO

Yaraanta samaynsanka hormoonka dumarka ee estarojin iyo dhibaatooyinka siilka	4
Ku daweynta Oestring	5
<i>Ayaa isticmaali kara Oestring?</i>	7
<i>Ma jiraan wax saamayno dhinca ka raac Oestring ah?</i>	7
Sida la isku geliyo, la iskagana beddelo Oestring	8
Muddo intee le´eg ayaa ah in la igu daweyyo Oestring?	10
Jadwalka beddelitaanka iyo xasuus-qorka	11

Yaraanta samaynsanka hormoonka dumarka ee osterjeen iyo dhibaatooyinka siilka

Marka la gaaro da'da ciso-goyska, waxa yaraada samaynta jirku samaynayo hormoonka dumarka ee osterjeen. Xuubabka dheecaanka sameeya ee siilka waxa ka taga kala jiidjiiidankiisii iyo dheecaanka oo waxay noqdaan qaar khafiif ah oo nugul. Dumar badan ayaa siilka ka dareema cuncun iyo hafeefasho, xanuun la dareemo marka galmoodka la samaynayo, iyo xitaa isku -siidayn (daroorin). In osterjeen la is geliyo ayey xuubabka dheecaanka sameeya ee siilka iyo kaadi-mareenku ku noqon karaan qaar qaro-weyn oo aad u kala jiidjiidmaya. Waxaad ka nasan kartaa dhibaatooyinkaaga siilka oo waxaad dib u heli nolol caadi aad u noolaato.



Xuubka dheecaanka sameeya ee siilka ee dumarka da'da waawayn ee aan laga dawayn waa mid khafiif ah oo aan kala jiidmayn.



Dawaynta meel ahaanta ku kooban ee osterjeenta ayaa uhorseeda inuu xuubka dheecaanka sameeya ee siilku inuu noqdo mid qaro-wayn, kana qoyaan badfan oo aad u kala jiidjiidma

Ku daweynta Oestring

Oestring® waa giraan jilicsan oo si tartiib ah u soo deynaysa xaddi yar oo ah hormoonka Osterdiol illaa muddo saddex bilood ah. Oestring waa hab fudud oo habboonaan leh oo aan lahayn wax dhegdheg ah, laguna sixi karo dhibaatooyinka siilka. Giraanta waxa la gelinayaa gudaha daloolka siilka (sida cudbida (tampon) oo kale), waxana la beddelaa saddex bilood kasta. Dumarka isticmaala Oestring badankoodu maba dareemaan giraanta, xitaa marka galmada. Haddii aad rabto inaad giraanta iska siibto si ku meel gaar ah, sida marka galmada oo kale, waa in aad ku mayrto biyo diirran inta aanad dib isu gelin.





Ayaa isticmaali kara Oestring?

Oestring waa dawayn habboon oo loogu talo galay qof kasta oo qaba calaamdo osterjeen yaraan ah, xilliga caado-goyska dhexdiisa. Daweyntu waa mid fudud oo ay isticmaali karaan haweenka hadda soo galaya ciso-goyska iyo haweenka woxoogaaga ka wayn.

Ma jiraan wax saamayno dhinca ka raac Oestring ah?


Bilawga hore ee dawaynta waxaad ka dareemi kartaa xuubka dheecaanka sameeya xasaasiyad. Waxa kale oo ay osterjeentu keeni kartaa dheecaan kordha oo loo qaadan karo siidayn. Dhibaatooyinkani waxay baab'aan 2-4 toddobaad ka dib. Daweynta Oestring kuma yeelanayso miisaankaaga wax saamayn ah.

Mararka qaarkood waxa soo bixi kara madax-xanuun iyo yalaalugo. Warbixin dheeraad ah ka fiiri warqadda macluumaadka dawada ee ku jirta baakadda.


Sida la isku geliyo, la iskagana beddelo Oestring

Oestring waa wax sahlan in la is geliyo iyo in la beddelo. Haddii aanad adigu karin in aad is geliso ama iska beddesho giraanta, waxa ku caawin karta kalkaaliso caafimaad oo degmo ama ummuliso. Giraanta la isticmaalay waxa loo celinayaa farmasiiga ama waxa lagu darayaa qashin-qubka qoyska, ha raacinin biyaha suuliga.

Gelinta: Istaag adiga oo hal cag ku joojinaya kursi, kadaloob u fadhiista ama dhabarka ugu jiifsada sariirta, cagaha oo kala baxsan oo kor u taagan. Cadaadi giraanta oo ka dhig sida ukunta oo kale. Giraanta geli gudaha daloolka siilka.



Giraanta si otomaatig ah ayey murqaha siilku u kaxaynayaan, dabadeed si sugan ayey ugu fariisanaysaa meesheeda oo ah qaybta sare ee siilka. Oestring way ka dhaqaaqi kartaa meesheeda, tusaale ahaan, haddii calool istaag darani yimaaddo oo hoos ayay u soo riixmaysaa. Markaa waa in aad haddana kor u riixdo uun.



Soo bixinta: Istaag adiga oo hal cag ku joojinaya kursi, kadalooob u fadhiista ama dhabarka ugu jiifsada sariirta, cagaha kala baxasan oo kor u taagan. Far iska geli siilka oo soo sudh fartaatada giraanta. Si qunyar u wareeji giraanta adiga oo markaa soo jiida.

Muddo intee le´eg ayaa ah in la igu daweeeyo Oestring?

Dhibkaaga waxa u sabab ah osterjeen yaraan dabiici ah. Wax ka qabashada goobta ee xaddidani waxay yaraynaysaa dhibka laakiin ma daweynayso. Marka aad iska joojiso, waxay u badantahay in dhibkii kugu soo noqdo. Sidaa darteed waa in aad dawaynta sii waddo ilaa inta aad caafimaad ku dareemayso.

Haddii aad qabto wax su´aalo ah ama aad caawimo uga baahantahay, la hadal dhakhtarkaaga, kalkaalisada caafimaadka, dhakhtarka kaadi-haysta ama ummuliso. Ma jiraan su´aalo ay la yaabaan ama ka qajilaan.



Jadwalka beddelitaanka iyo xasuus-qorka:

Lambarka giraanta: _____ Taariikhda gelinta: _____ Taariikhda beddelidda: _____


Lambarka giraanta: _____ Taariikhda gelinta: _____ Taariikhda beddelidda: _____

Lambarka giraanta: _____ Taariikhda gelinta: _____ Taariikhda beddelidda: _____

Lambarka giraanta: _____ Taariikhda gelinta: _____ Taariikhda beddelidda: _____

Ref: 1. SBU rapport, Behandling av symtom vid klimakteriebesvär, nr 159; kapitel 4, maj 2002.

Waxa hubisay xaqiiqda aqoonta: Lena Joanzon, uroterapeut.



Astaamaha Oestring (hormoonada ilmogaleenka): Terabiga beddelka ah ee loogu talagalay calaamadaha estarojin (oestrogen) la'aanta. **Xajmiyada iyo quwadaha baakada:** Dhexgalin siil 7.5 mcg/24 saacadood. 1 baako xaanshi-bireed. **Qiyaasta daawada:** La gashanaado si isdabajooq ah illaa 90 maamood, kadibna lagu beddelo giraan cusub. Si taxaddir leh u akhri macluumaadka ku qoran buug-yaraha macluumaadka bukaanka. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, eeg:** www.fass.se.

Pfizer, 191 90 Sollentuna. Telefoonka 08-550 520 00. www.pfizer.se

Pfizer AB. 191 90 Sollentuna, Sweden.
+46 (0)8-550 520 00. www.pfizer.se